



ismaamulka san diego




BMP-yada taagiga biyaha iyo kanaalada dhulka hoostiisa

Maamulka ugu fiican ee Nidaamka Dhismaha Biyaha Daadka (BMPs) ayaa lagu rakibaa dhismeyaasha qaar oo ku yaala Ismaamulka si ay gacan uga gaystaan **kahortaga maadooyinka wasaqda ah** sida qashinka, daawooyinka bacriminta beeraha, sunta cayayaanka, iyo qaruuraxa soo gala marinnada biyaha daadka roobka kadibna galaaya baliyadda, wabiyada, iyo badwaynta deegaankeena. Gurigaaga waa mid kamid ah boqolaalka ku yaala Ismaamulkeena oo leh ugu yaraan hal BMP.

BMP-yadu Waxay Nadiifiyaan Marinnada Biyaheena

BMP-yadaada waxaa loo sameeyay inay maadooyinka wasaqda ah ka saaraan biyaha roobka ee kasoo dareera dhismahaaga ilaa heerka u sareeya eesuuragalka ah. Maadaama aad tahay mulkiilaha mid kamid ah dhismeyaashaan, xeerarka ismaamulka ayaa kaa doonaaya inaad **samayso kormeer joogto ah iyo talaabooyinka dayactirka** si loo hubiyo in BMP-yadaada si sax ah u shaqaynayaan.

SAWIRKA 1 **Taangiga Biyaha**



Diiwaanadeena ayaa muujinaaya in aad haysato hal BMP ga taangiga biyaha ama kanaalka dhulka hoostiisa mara oo ku xiran gurigaaga. Si ay kaaga caawiso joogtaynta BMP-gaan **Barnaamijka Ilaalinta Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego** ayaa ku siinaaya buugaan xogta si looga jawaabo su'aalaha aad ka qabi karto BMP-yada iyo sida aad u joogtaynayso.


Sida u Shaqeeyo Ceelkaaga

Si ka duwan dagaandegyada dabiiciga ah ee awooda u leh inay dhuuqaan biyaha roobka, meelaha dusha adag sida saqafyada iyo wadooyinka laamiga ah ayaa abuura cadad badan oo daadka roobka ah.

Taangiyada biyaha qabta ayaa xal u ah saamayntaan ayagoo biyaha daadka roobka qabanaaya kadibna si tartiib ah u siidaynaaya in muddo ah, si loo yareeyo saamaynta ay ku yeelanayaan bii'ada (arag sawirka 1 aad). Siidayntaan xakameysan ee biyaha daadka ayaa difaacaysa kaabeyaasha nidaamka qaada biyaha daadka, kadibna yareeya suurtagalnimada saamaynada nabaad guurka ciida ee kanaalladiyo balida ka ag dhow.

xog dheeraad ah >>>



SAWIRKA 2 **Dhuumaha Dhulka Hoostiisa****Sidee ayay Dhuumahaaga Dhulka Hoostiisu u Shaqeeyaan**

Dhuumaha Dhulka Hoostiisa (arag sawirka 2 aad) ayaa baxsha isla faa'iidooyinkaas, ayagoo leh faa'iidada dheeriga ah ee qabashada wasaqda ayagoo adeegsanaaya miireeyaasha. Qayb kamid ah biyaha daadka oo lagu qabtay dhuunta dhulka hoostiisa ayaa geli doona ciida ku xeeran, taasoo yaraynaysa cadadka wasaqda lagu siidaayo nidaamka daadka roobka ee ka ag dhow.

Hel oo Hayso BMP gaaga

Ceelkaaga ama dhuumaha dhulka hoostiisa ayay u badan tahay inaad ku rakibto aagga goobaha sidibta ah ee gurigaaga, oo ah meel dabiici ah oo biyaha daadku maraan. Haamaha biyaha ayaa badanaa la dhigaa meesha minjaroor ku biyaha ku shubaayo. Dhuumaha Dhulka Hoostiisa ayaa caadiyan leh tuubo biyuhu ka galaan oo kor looga jeedo.

Marka aad hesho haantaada biyaha qabata ama dhuumaha Dhulka Hoostiisa, waa muhiim inaad joogtayso. Ku haynta BMP-gaaga xaalad shaqaynaysa ayaa kaa caawinaysa inaan ilaalino nadaafada marinada biyaha ee deegaankeena. Hoos waxaad ka helaysaa dhawr shaqooyinka dayactirka ah si aad u samayso:

- **Xaqiiji marinnada ay kasoo galaan iyo kuwa ay ka baxaan biyaha galaaya haamaha iyo dhuumaha dhulka hoostiisa aysan lahayn xash, qashin, ama qaruurax isku xiray.**
- **Dayactir oo badel difaacyada kanecada kasta oo jabay ama aan shaqaynayn.**
- **Dhuumaha dhulka hoostiisa ayaa lahaan doona tuubada biyaha sifaysa ama barta gelitaanka si loo arko gudaha dhuunta (arag sawirka 2 aad). U adeegso meeshaan laga galo si aad uga buufiso qaruurax kasta ama xashka isku goyn kara nidaamka. Dhuumaha waawayn ee dhulka hoostiisa, taraaga haawinta ayaa loo baahan karaa.**
- **Xogta shirkada samaysay qalabka ayaa badanaa ku qoran baraha laga galo ama duleellada BMP ga. La xariir shirkada qalabka si aad u hesho tilmaan gaar ah oo ku aadan sida qaab sax ah loogu ilaaliyo agabka gurigaaga.**

Sanad kasta Barnaamijka Difaacaha Waraha Biyaha ayaa kuusoo diraaya foomka xaqiijinta dayactirka si aad u buuxiso, u saxiixdo, aadna ugu celiso Ismaamulka. Foomkaan waxaa loo adeegsadaa in la xaqiijiyo in dayactirka muhiimka ah lagu sameeyay BMP-gaaga.

KU fashilmida samaynta dayactirka BMP-yadaada ayaa dhalin karta fulinta baaritaan ama kormeerka dabagalka ah.

Haddii aad qabto su'aalo, Nagalaso Xariir: Barnaamijka Ilaalinta Waraha Biyaha

Taleefanka **1-858-495-5323**

limeelka **BMP.Program@sdcounty.ca.gov**

Ama booqo **www.sandiegocounty.gov/stormwater**

kadibna guji "Maintaining My Structural BMP (Dayactirka BMP ga Dhismahayga)"



waad ku mahadsan tahay samaynta qaybtaada si

loo ilaaliyo marinadeena biyaha

